3

Masaruufka caruurta

SOM 003/**2018**

Dumarka oo Dhan. Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow Xuquuqahaaga.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Masaruufka caruurta

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, waxaa lagugu talinayaa in aad raadsato la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si aad u fahamto dalabyadaada oo si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa Caawinta Dhibaatada Xeerka Qoyska". Sidoo kale waxaa laga yaabaa in ay waxtar kuu tahay in aad daawato fiidiyowga internetka ku jira "Raadinta Qareenka Qeerka Qoyska" iyo kuna qoran boggeena www.onefamilylaw.ca.

Ubadka wuxuu xaq u leeyahay in labada waalidba ay ka helaan masruuf. Haddii adiga iyo waalidka labaad aadan wada nooleyn, waa in aad qeybsataan kharashka daryeelka ubadka.

Waalidiinta waa in ay dhaqaale ahaan masruufaan ubadkooda inta badan, xitaa haddii:

- iyaga aysan ubadka ula nooleyn;
- iyaga aysan ubadka arkeyn marka laga reebo xaalado dhif ah oo ilmuhu diiday waalidka sababo an macquul ahayn;
- aysan isqabin waalidka kale; ama
- aysan abidba aysan waalidka kale la nooleyn.

Haddii ubadka inta badan adiga kula noolyahay), tan waxaa la yiraahdaa **degaanka ugu weyn** ee ilmaha iyo waxaad xaq u leedahay in waalidka kale ku siiyo **masruufka caruurta**. Waxaad tahay qofka qaata oo waalidka kale waxaa loogu yeeraa **bixiye**. Haddii ilmuhu inta badan ku nool yahay waalidka kale, markaa waa inaad bixisaa masruufka caruurta ee ilmahaaga.

Waalidka bixiyaha ah waa waalidka caruurta dhalay ama midka korsaday. Ruuxa korsaday caruurta oo waalidnimo horey u muujiyey asaguna waa in uu bixiyaa masruufka caruurta.

Sidee loo helaa masruufka caruurta

Adiga iyo waalidka kale oo caruurta dhalay waad ku heshiin kartaan bixinta masruufka caruurta. Waxaa fekrad wanaagsan ah in heshiiskaada aad ka dhigtaan mid **qoraal ah**, taariikhduna ku qoran tahay Waalid waliba waa inuu **saxiixaa**, mid kasta hortiisa horteeda qof gaar ah oo loogu yeedho **markhaati**. Waxaa wanaagsan in labada waalidka ay qareen u tagaan ee uu heshiiska arko, Maxkaddana loo gudbiyo.

Haddii aad ku heshiin weydaan xisaabta, haddii xiriirkaaga waalidka kale ahaa ama yahay mid dibindaabyo badan leh, haddii heshiiska la isku raaci waayo, ama haddii ubadka adiga kula nool yahay mar mar qaarkooda oo aad masruuf u baahan tahay, Maxkamadda ayaad weydiisan kartaa in ay masruuf Amarto. Xaaladdan oo dhan, waxaa fekir wanaagsan ah in qareen lala hadlo.

Intee muddo ah ayuu waalidka kale bixinayaa masruufka caruurta?

Masruufka caruurta bixintiisa waa in ay socotaa inta uu canugga yahay canug ku tiirsan. Sida ay u badantahay, waa ilaa iyo inta uu 18 jir ka gaaro cananga. Waalidka bixiyaha ah waa inuu sii wadaa inuu masruufka sii bixiyo ka dib marka canuga 18 jirsado, haddii ubadka uusan iskiisa isudaryeeli karin maxaa yeeley iyada ay xanuunsan tahay, ama yahay ubad naafo ah, ama yahay arday waqti buuxa iskuulk dhigta. Caruurta ka weyn 16 sano jir ma ahan mid waalidka ku tiirsan haddii uu guursado ama guriga iskaga tago.

Waalidka ilmuhu la nool wakhtiga intiisa badan wuxuu xaq u leeyahay in masruuf la siiyo xitaa haddii u waalidkadib u guursato ama bilowdo in qof kale ay wada nool yihiin.

Sidee ayey Maxkamadda u xisaabtaa qiyaasta lacagta masruufka la bixinaayo?

Dowladda dhexe iyo tan gobolka ayaa go'aamisa lacagta ugu yar ee uu bixinaayo waalidka masruuf bixiyaha ah. Lacagta la bixinaayo waxay ku saleysantahay qiimaha nolol maalmeedka ee gobol kasta ka jira. Habka lacagtan loo bixinaayo waxaa lagu xisaabiyaa oo ay ku qoran tahay buugga **Tilmaan Bixiyaha Masruufka Caruurta** kaasoo oranaya inta la doonayo in la bixiyo.

Ee **Xeerarka ku qoran ayaa loo isticmaaley** in lagu oggaado tirada aassaasiga ee masruufka la bixinayo. Gobol kasta iyo deegaan kasta waxaa jira shaxan kala duwan ee la isticmaalay. Mar marka badankooda, Maxkamadda waxay isticmaali doontaa Shaxankaka Masruuka Caruurta ee Amarada Maxkamadda ee la xiriira masruufka caruurta.

Shaxankanka quseeya ayaa badanaaba lagu saleeyaa halka bixiya Kanada kaga noolyahay. Tusaale ahaan, haddii labada waalidiinba ay Ontario kuwa noolyihiin, Shaxanka Ontario ayaa lagu dabaqayaa. Haddii bixiyaha uu ku nool yahay gobol kale ama deegaan kale, Shaxanka gobolkaas ama deegaankaas ayaa lagu dabaqayaa. Laakin haddii bixiyaha uu ku nool yahay meel Kanada baxdan, oo waalidka caruurta daryeelaya ku nool yahay gobolka Ontario, Shaxanka Ontario ayaa lagu dabaqayaa.

Lacagta ugu yare e uu bixinaayo waalidka bixiyaha ah waxaa laga xisaabaa:

- inta uu la egyahay **dakhliga sanadlaha ee guud** ee soo gala waalidka bixiyaha ah. Tani waxaa loola jeedaa guud ahaan inta uu la

egyahay dakhliga bixiyaha ka hor ee isaga ama iyada ay bixin jirtey ka hor inta aanan laga jarin canshuuraha dowladda ama wixii kale oo laga jari lahaa, iyo

- tirada caruurta kale oo masruuf ka raba waalidkan bixiyaha ah ee uu ka mas'uulka yahay.

Haddii bixiyaha uu iskaa u shaqeeyo ama uu leeyahay ganacsigiisa, waxaa laga yaabaa inaanay caddeyn inta ay leeg tahay bixiyaha. Lacag bixiyaha waxaa laga yaabaa inuu ka gooyo kharash badan oo ka soo gala dakhligooda ama ma bixinayo wax badan si markaa dakhligoodu u muuqdaan kuwo ka hooseeya sida dhabta ah. Haddii bixiyaha uu iskaa u shaqeysto, waxaad xaq u leedahay inaad weydiiso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dakhligooda, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan ganacsigooda.

Mar marka badankood, Maxkamadda waxay ku xukuntaa in bixiyaha uu bixiyo lacagta aassaasiga ee ku qoran Xeerarka. Hase-yeeshee, mar marka qaarkood, Maxkamadda waxay ku xukuntaa lacagta taa soo ah inta u dhaxeya waxa ku qoran Xeerarka, sida:

- goorta la bixinayo masruufka canug ka weyn 18 sano jir ah;
- haddii ubadka ku dhawaad waalid kasta isku waqti la qaato;
- haddii ay jiraan caruur dhowr ah ee xiriirka ka yimid, oo labada waalidiinba ay ugu yaraan haystaan hal canug ee iyaga la nool, ama;
- haddii bixiyaha ay soo gasho daqli sanadle oo aad u sareeya.

Mar mar kan, Maxkamadda waxay eegtaa xaaladda qoyskaaga. Lacagta masruufka waxaa lagu saleyneynaa daqliga soo gala labada waalidba iyo inta ay caruurta u baahan karaan.

Sidoo kale waxaa dhici karta in aad hesho masruuf dheeraad ah haddii ay jiraan **qaraashaad gaar ah ama aan caadi ahayn** sida kharashka ku aadan xanaanada caruurta Ama xanaanada caruurta, kharashyada ka baxsan waxbarashada iyo kharashaadka waxbarashada, ama kharashyada daryeelka caafimaad ee aan daboolin qorshe caymis caafimaad oo gaar ah ama dawladeed. Maxuu yahay iyo ma aha kharash gaar ah waxay ku xiran tahay dakhliga waalidka iyo baahida ilmaha, sidaas darteed waa fikrad fiican inaad la hadasho qareen ku saabsan kharashyada dheeraadka ah.

Haddii uu canuggaada uu qabo baahi gaar ah, adiga iyo waalidka kale waa in aad wada qeybsataan kharashkaas. Qeybta uu qof kasta bixin doono waxay ku xirantahay dakhligaada.

Marar nadir ah, Maxkamadda waxaa dhici karta in ay yareyso lacagta masruufka ah. Maxkamadda waxay kaliya ay arrintan sameysaa haddii waalidka bixiyaha ah uu caddeyn karo in cadada ku qoran Xeerka ay uu keeni karto **darxumo xad-dhaaf ah**. Tani waxay micnaheedu tahay ineysan waalidku awoodi karin iney iska bixiyo qarashka nolol maalmeedkod. Tusaale ahaan, Maxkamadda waxay ka yareen kartaa cadada masruufka haddii bixiyaha ay haysato naafonimo ama haddii uu caruur kale masruufo.

Ka hor inta aan la oggolaan darxumo xad-dhaafta ah ee la sheegtey, Maxkamadda waa in ay eegtaa daqliga **xubno kasta** ee labada aqal waalidka ka idbna la isku barbardhigo habnololeedka **aqalka qoyska kasta**. Tani waxay micnaheedu tahay haddii adiga ama waalidka kale uu dib u guursado ama la nool yahay qof kale, Maxkamadda taasi way texgelinaysaa.

Goorta canshuur celinta la buuxsanayo, bixiyaha canshuurta kuma sheegan karo lacagta uu masruuf Adigana ma ahan inuu ku sheegto lacagta aad masruuf ahaan u hesho sida inuu daqli yahay.

Wax ma ka bedeli karaa heshiiska ama Xukunka Maxkamadda ee ku aadan lacagta masruufka loo bixiyo?

Haddii adiga iyo waalidka kale aad go'aan heshiis wada la heydeen oo aad labadiinaba ku heshiisaan in aad bedeshaan lacagta masruufka ah, waa in aad heshiis cusub wada gashaan. Haddii aad adiga iyo waalidka kale aad ku heshiin waydaan isbadelka heshiiskii horey u jirey, qof idinka mid ah ayaa Maxkamadda weydiisanaayo in Xukun la soo saaro oo masaruufka wax laga beddelo. Haddii aad ku heshiin waydaan, qof idinka mid ah ayaa maxkamadda weydiisanaayo in xukunka jiro wax laga beddelo.

Haddii ay horeyba Maxkamadda kugu Xukuntey, waa in aad Maxkamadda aad isbadel weydiisataa oo ku aadan lacagta masruufka caruurta ama shuruud kale oo kasta oo Xukunka jira. Kani waxaa loogu yeeraa **Xukunta masruufka caruurta oo badalmaya**.

Maxkamadda waxay xukunkan wax ka beddeleysaa oo keli ah haddii uu dhaco isbedel wayn, tusaale ahaan, haddii waalidka bixiyaha ah oo dakhligiisa kordho ama yaraado, haddii xaaladda canugga oo wax iska beddela ama haddii ay soo baxaan kharashyo gaar u ah canugga oo cusub.

Sabab kale ee Maxkamadda ay wax uga baddeli karto lacagta masaruufka waa haddii Xeer cusb ee sharci noqdo. Lacagta masaruufka canuga ee Amarka jira ama heshiiska yahay mid ku salaeysan Xeerarkii hore aysan si toos ah wax iska badelin goorta sharciga isbadelo. Haddii Xeerarka cusub baddelo lacagta masaruufka ee aad qaadato, waa in aad Maxkmadda aad weydiisataa in ay Xukunka ee masaruufka wax ka beddeshaa. Haddii aad masaruufka cannug aad qaadato, waxaa talo wanaagsan ah in.

Sanado dhowr ah ka dib la eeggo, si loo oggaado haddii ay soo baxeen Xeerar Masruufka Ilmaha ee cusub. Qareen xeerka qoyska ayaa sidoo kale arrintan kaa caawin kara.

Xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadyada ku saaran

Marka aad codsato masruufka caruurta, waxaad leedahay xaq, waxaana ku saran waajib.

1. Xaq waxaad u leedahay in aad ogaato dakhliga soo galo waalidka bixiyaha ah

Haddii aad codsato, ama aad qaadato masruufka caruurta, waxaad xaq u leedahay in aad run ahaan u ogaato dhaqaalaha bixiyaha. Arrintan waxaa la yiraahdaa **soo bandhigidda dhaqaalaha**.

Waad u baahantahay xogtan si aad u hubiso in lagac bixiyaha uu bixiyo cadadda runta ee masaruufka ubadka ee ku beegan. Sharciga wuxuu farayaa waa in lagac bixiyaha uu soo bandhigaa xogta ku beegan dakhligodasanad kastaba Hadi aad weydisato.

Mararka qaar, waxaa dhacda in waalidka bixiyaha ah ayna wada shaqeyn muujinin. Waxaa dhici karta:

- in uusan ku siinin xogta aad codsatay, ama;
- uu doorbido in uusan shaqeynin ama lacag yar ku shaqeeyo si uusan u bixinin masruufka caruurta.

Haddii ay tani dhacdo, waa in aad Maxkamadda ka dhaadhicisaa in bixiyaha shaqeysan karo in intaa ka badan balse doortey inuusan kasban. Maxkamadda waxay isticmaaleysaa dakhligan la qiyaasay si ay ku gaarto qiyaasta lacagta loo bixinaayo masruufka caruurta. Tani waxaa loogu yeeraa daqli loo **xisaabiyo** waalidka bixiyaha ah. Maxkamadda waxay isticmaali kartaa daqli ay xisaabiso si ay u oggaamiso inta la doonayo in ay noqo lacagta masaruufka Ee aad heli doonto.

2. Waalidka Lacagta Cayrta ah ku nool

Sannadka 2017, dawladda Ontario waxay soo saartey sharciyo cusub oo ku saabsan masruufka caruurta ee

loogu talagalay waalidiinta ku jira gargaarka bulshada (Ontario Works (OW) ama Barnaamijka Taageerada Naafada Ontario (ODSP)).

Haddii aad qaadatid lacagaha kaalmada bulshada, labada lacagba wad haysan kartaa OW ama ODSP iyo lacagta taageerada ilmaha oo dhan. Dawladdu waxay u adeegsatay inay bixiso gargaar bulsheed oo ka yar haddii aad heleyso ama ay heli karto taageero ilmo. Taasi ma ahan xukun kale, laakiin weli waa inaad soo sheegtaa inaad qaadato lacagta masruufka carruurta haddii aad sidoo kale bixiso lacagaha kaalmada bulshada.

Waalidka cayrta ku nool xitaa waxaa laga sugayaa in uu bixiyo qaar ka mid ah masruufka caruurta, ee sida ku qoran Xeerarka. Bixiyaha waxaa laga filanayaa inuu bixiyo masruufka caruurta xitaa haddii daqaliga sanadlaha u umuuqato in ay yar tahay.

Dawlada Ontario waxay dejisaa xadka, waalidkuna ka yar yahay xaddiga ma aha inuu bixiyo masruufka caruurta. Waxaad weydiin kartaa xafiiska gargaarka bulshada ama waydiiso garyaqaanka sida loo ogaado haddii lamaanahaagu ka hooseeyo xadka masruufka caruurta.

Side Aya Lo Hirgelinaaya Xukunka Taagerada?

Xukunka bixinta masruufka caruurta ee Ontario waxaa hirgelinaayo **Xafiiska Waajibaadka Qoyska [*Family Responsibility Office* (FRO)]**. FRO waa xafiiska hoostaga dowladda gobolka. Xukun Maxkamad kasta oo ku saabsan masruuf ubadka waxaa si toos ah looga diiwaan geliyaa xafiiska FRO. Qofka taageerada **bixiya** waa inuu ogolaado inuu joojiyo FRO inuu meelmariyo amarkaaga taageerada.

Haddii adiga iyo waalidka hore aad go'aan masruuf ubadka isla gaartaan doneysan in FRO ay fuliso waa in marka hore la xereeyo heshiiskii Maxkamadda. Kadib

waxaad la xiriiri kartaa xafiiska FRO si aad u ogaato sida loo hubiyo inay fulinayaan.

Sidee ayuu u shaqeeyaa xafiiska FRO?

Kolka xafiiska FRO la soo gaarsiiyo amarka Xukunka, waalidka bixiyaha ah waa in uu lacagta masaruufka ubadka u soo gudbiyaa xafiiska FRO. Marka xafiiska FRO helo lacagta gacanta ku dhigo, adiga ayuu kaddibna kuu soo gudbin doonaa.

Xafiiska FRO wuxuu maamulaa qoysas fara badan. Sidaa darted xafiiskan waa howlo badanyahay, waxaa laga yaabaa in aad sugtid lacagtaada muddo bilooyin ah ka dib marka aad soo dirsato Xukunka ka hor inta aaddan bilaabin inaad hesho lacagta masaruufka ubadka. Haddii FRO anay haysanin macluumaad ku saabsan dakhliga bixiyaha ama hantida kale, waxay kuu qaadan kartaa waqti dheer inaad bilowdid inaad hesho lacag.

Maxaa dhacaya haddii bixiyaha uu bixin waayo lacagta?

Mararka qaar, waxaa dhacda in bixiyaha uu ka daaho bixinta ama uu gafo bilooyin. Waa kan waxa la sameeyo marka ay taasi dhacdo xafiiska FRO si uu lacagta ku helo wuxuu sameyn karaa:

- Haddii uu qofkaas shaqeeyo, FRO ayaa shaqadiiska ku ari karta in lacagta masruufka laga jaro mushaarka qofka oo FRO loo dirro. Tani waxaa loogu yeeraa **mushahar ka qabsasho**.
- Haddii bixiyaha uusan shaqeynin ama iskii u shaqeysto, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in uu koontada bangiga qofkaas uu si toos ah ugala baxo lacagta masruufka. Arrintan waxaa lagu magacaabaa **Ka qabsasho ruuxa koontadiisa bangiga**. Xafiiska FRO wuxuu kaloo sameyn karaa in uu ka **rahaanad** ka saaro hantida uu

leeyahay ruuxaas sida baabuurka ama guriga. Haddii uu qofkaasi isku dayo in uu iibiyo hantidiisa, xafiiska FRO wuxuu halkaa kala baxayaa lacagtii ruuxaas lagu lahaa, si adiga lagu siyo.

- Haddii uu bixiyaha uu yahay ruux had iyo jeer la daaha lacagta ama lacag tiro badan lagu leeyahay, xafiiska FRO wuxuu isku dayayaa in aay lacag bixinta adoo ka warbixinaya bixiyaha xafiiska xisaabinta, ka xannibo shattiga baabuur wadidda iyo/ama basaboorka. Ama xabsiga la galiyo.
- FRO waxay qaadan kartaa lacag ay dawladdu ku leedahay bixiyaha sida bixinta canshuur celinta ama faa'idada caymiska shaqada, si loo bixiyo lacagta masruufka carruurta.
- FRO waxay u wargalin kartaa bixiyaha xafiiska Hey'addaha Bankiga Lacageed ee lacag bixinta. Haddii bixiyaha uusan samaynin lacagta masruufka caruurta lix bilood ama ka badan, FRO uusan awoodin in uu helo lacagta bixiyaha, waxay u diri kartaa macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan bixiyaha bogga internetka ee ku saabsan waalid aan lacag bixin. FRO waxay heli doontaa oggolaanshaha waalidka u qaabilsan ka hor intaadan samaynin.

Xeerarka Gaarka ah ee Bulshooyinka asaliga ah

Haddii waalidka bixiyaha ahi uu yahay Hindida asaliga ah marka loo eego *Xeerka Dhexe ee Hindida*, xaaladaha qaarkood sharciga federaalku wuxuu xadidayaa sida FRO uu u meelmarin karo Amar Maxkamad ee taageerada ilmaha:

- Haddii qofka qaataha ah (ilmaha ama lammaanaha) uu yahay Hindida Mareykanka ah laakiin qofka bixiyaha ah ma aha Hindida

Asalka ah, FRO wuxuu wali ku dabaqi karaa dhammaan xeerarka si loo xoojiyo amarada masruufka ilmaha iyo xaaska.

- Haddii bixiyaha uu yahay Hinditaha Xaaladda ah laakiin qofka qaataha (ilmo ama lamaane) ma ahan Indian Indian, markaa FRO waxay kaliya u adeegsan kartaa shuruucda hantida hanti maguurtada ah ama lacagta laga helay "Reserve". FRO ma awoodi karto inay bixiso lacag kasta oo ka mid ah hantida, ama dakhliga lagu kasbado, Kaydso. FRO waxay wali xoojin kartaa amarrada taageerada siyaabo kale, sida soo wargalinta bixiyaha xafiiska canshuuraha, iyaga oo hakinaya liisanka darawalnimada iyo baasaboorka, iyo xabsi dhigista iyagoo aan lacag bixin.

Waxaa muhiim ah in la ogaado **inaadan** diidi karin waalidka bixiyaha siinta ilmahaaga, si aad u daahisid ama aadan u bixin masruufka carruurta. Waxaad diidi kartaa oo keliya in waalidku u arko ilmahooda marka ay xaq u leeyihiin sharcigaas, haddii aad ka baqaysid nabadgelyada ilmahaaga - xaaladdan, waa inaad isla markiiba heshaa caawimo. Waxaad kala hadli kartaa qareen ku saabsan fursadahaaga. Xaalad degdeg ah, wac booliiska 911.

Maxaa dhacayo haddii bixiyaha uusan ku nooleyn gobolka Ontario?

Xafiiska FRO wuxuu kaa caawini karaa in uu bixiyaha ka soo qaado lacagta masruufka haddii uu ku noolyahay meel kasta oo ka mid ah waddanka Kanada ama Mareykanka. Taasi waxaa suuro gal ka dhigeyso heshiisyada ka dhaxeeyo gobollada Kanada oo idil iyo Mareykankaba oo u suuro gelinaayo in xafiiska FRO iyo xafiiska la mid ah ee ku yaala gobolada iyo gobolada Mareykanka si loo hirgeliya Xukunka masaruufka caruurta ee xudduudahan. Sidoo kale gobolka Ontario wuxuu heshiis kaa la mid ah la leeyahay dowladaha Bermuda, Ghana, Hong Kong, United Kingdom, iyo dalal badan oo Europe ah.

Haddii waalidka bixiyaha ah uu ku noolyahay waddan aan heshiis la lahayn gobolka Ontario, xafiiska FRO ma jirto wax uu ka qaban karo uu ku dirdirgelin karo Xukunka masaruufka ubadka. haddii aadan haysanin macluumaadka uu waalidku bixiyay dakhliga ama hantida Ontario. Haddii kale Sida kali ah oo wax looga qaban karo arrintan masaruufka ayaa waxay tahay in la tiigsado sharciga waddankaas u degsan ee bixiyaha uu ku nool yahay. Si sidan loo sameeyo, qareen ayaa laga yaabaa inuu wax ka qabto.

Waxaa jira halis weyn oo rabshado ah goorta xiriir soo jirey uu dhamaanayo. Haddii aad ku jirto halis kugu soo dhow, wac 911. Haddii adiga ama qof kale ee aad taqaano halis ku jiro, booqo www.onefamilylaw.ca si aad u hesho macluumaad taageero ah.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Family Law topics available in English*

1. Xallinta khilaafaadka kale iyo Sharciga Qoyska (SOM 001)
2. Ilaalinta Caruurta iyo Sharciga Qoyska (SOM 002)
3. **Masaruufka caruurta (SOM 003)**
4. Dembiyada iyo Sharciga Qoyska (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo Helitaanka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiiska Guriga (SOM 006)
7. Xeerka Qoyska Xalinta Khilaafaadka (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska ee Arrimaha Qoyska ee Qaxootiga, Qoxootiga iyo Haweenka aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Helitaanka caawimaadda dhibaatada Sharciga Qoyska (SOM 009)
10. Sida Hantida loo kala qaybiyay Sharciga Qoyska
11. Guurka iyo Furiinka (SOM 011)
12. Taageerada labada is-qabta (SOM 012)

** Buug-yarahan waxaa lagu heli karaa noocyo badan iyo luuqado badan. Fadlan fiiri www.onefamilylaw.ca wixii macluumaad dheeraad ah. Waxa kale oo aad ka heli kartaa alaab dheeraad ah bogga internetka si ay kaaga caawiso fahamka xuquuqdaada sharciga qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Waxaa Maalgeliyey:
Ontario

Aragtida lagu soo bandhigay buugan yar ayaa ah aragtida FLEW oo aan daruuri ahayn inay ka tarjumayso kuwa Gobolka